

Kahortagga Macluumaadka Aan La Hubin ee Ku Saabsan COVID-19

Iyada oo la tixgelinayo cudurka saf-marka ah ee COVID-19, Magaalada Columbus waxay qaadaysaa talaabo walba oo looga hortagayo, wargelin iyo wacyigelinna loogu samaynayo dhammaan dadka magaalada deggan, oo ay ku jiraan dadka Maraykanka Cusub ah, halista u banbaxa cudurka iyo sida ugu habboon ee looga hortago faafitaanka COVID-19. Waa arrin ahmiyad aad u weyn inoo leh in dhammaan dadka magaalada deggani ay muujiyaan taxaddar walba oo lagu hakinayo laguna cirib tirayo faafitaanka fayruska.

Xaaladdani waa mid ugub ah oo maalin walba is baddeli karta. Haddii ay soo kordhaan warar cusub, waxaan doonaynaa in la hubiyo in warbixinta dadka lala wadaagayo ay ku salaysnaato xaqiiqda oo ay sax tahay. Sidaas awgeed, si looga hortago faafitaanka ku-tiri-ku-teenta, waxaan dadweynaha u soo jeedinaynaa in la raaco talooyinkan:

Warbixin sugan oo ku saabsan COVID-19 ka raadso ilo rasmi ah oo la hubo. Fadlan ka fogow in aad soo gudbiso/dadka la wadaagto wararka aan la hubin oo lala beegsanayo bulshada magaalada ku dhaqan qaybaheeda kala duwan. Waa lama huraan in aan muujinno mas'uuliyad, iyo in aan ognahay wararka aan ka helno deriska ama baraha bulshada.

Wararkii u dambeeyay oo sax ah kuna qoran afaf kala duwan ka doono shabakadahan:
Columbus Public Health <https://www.columbus.gov/coronavirus>
Franklin County Public Health <https://covid-19.myfcph.org/>
Ohio Department of Health <https://coronavirus.ohio.gov/wps/portal/gov/covid-19/>
Centers for Disease Control & Prevention (CDC) <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>

Ka hortag eexda adiga oo fahamsan in aan qofka faafinaya cudurka COVID-19 lagu ogaan karin sida qofku u eg yahay. Fayrusku gaar uguma dhaco dadyow gaar ah, jinsiyado ama midab gooni ahna ma beegsado.

Xaaladda si dhow ayaan ula soconnaa, wixii warbixin sax ahna waan idinla wadaagi doonnaa iyada oo la soo marsiinayo ilaha ku habboon sida war murtiyeed rasmi ah, hay'adaha saxaafadda saxda ah iyo saamileyda bulshada ee la hubo.

Waxaa la joogaa xilligii aan dhammaanteen u midoobi lahayn in aynu la dirirno cudurkan saf-marka ah oo aan ula dhaqmi lahayn qof walba si naxariis, ixtiraam iyo tixgelin leh.

